

XAASHIDA MACLUUMAADKA EE CILMI-BAARISTA

Aragtida Booqdayaasha ee Tayada Biyaha Harada*

Waxaa lagugu casuumayaa inaad ka qaybqaadato cilmi-baaris ku saabsan aragtida dadweynaha ee tayada biyaha harada, si loo barbar dhigo isbeddellada la cabbiri karo ee tayada biyaha. Waxaa lagu xushay inaad noqoto ka-qaybgal suurtagal ah sababtoo ah waxaad booqanaysaa hara ku lug leh mashruucan. Waxaan ku waydiisanaynaa inaad akhrido foomkan oo aad waydiiso su'aalo kasta oo aad qabtid ka hor intaadan oggolaan inaad daraasadda ku jirto.

Cilmi-baaristan waxaa wadda: Bonnie Keeler, PhD, Dugsiga Humphrey ee Arrimaha Dadweynaha, Jaamacadda Minnesota.

*Maaliyadda mashruucan waxaa bixisay Sanduuqa Aaminaadda Deegaanka iyo Kheyraadka Dabiiciga ah ee Minnesota, sida lagu taliyay Guddiga Sharci-dejinta iyo Muwaadiniinta ee Kheyraadka Minnesota (LCCMR).

Habraacyada:

Haddii aad oggolaato inaad ka qaybqaadato cilmi-baaristan, waxaan kaa codsaneynaa inaad fariin qoraal ah u dirto lambarka telefoonka ku qoran calaamada, kadibna ka jawaabto su'aalaha lagu soo diro fariin ahaan. Waad joojin kartaa kaqaybgalkaaga waqti kasta.

Afeef: Markaad gudbiso sawirro, waxaad oggolaatay in cilmi-baarayaasha ku lugta leh daraasaddan ay si joogto ah u leeyihiin xaqa ay ku beddeli karaan sawirrada, kuna daabici karaan ama dib u daabici karaan sawirrada ama qaybo ka mid ah sawirrada, iyagoo adeegsanaya nooc kasta oo warbaahin ah oo hadda jira ama mustaqbalka la horumariyo.

Sir ahaanshaha:

Inta lagu guda jiro barnaamijka, macluumaadka daraasaddan waxaa loo hayn doonaa si gaar ah waxaana loo kaydin doonaa si ammaan ah. Kaliya kooxda cilmi-baarista, oo ay ku jiraan Jaamacadda Minnesota, Jaamacadda St. Thomas, iyo Jaamacadda Washington (bixiyaha tiknoolajiyadda), ayaa heli doona xogta kugu aqoonsan karta adiga. Macluumaadkaaga aqoonsiga lama wadaagi doono kuwa kale oo ka baxsan daraasaddan cilmi-baarista. Si kastaba ha ahaatee, ururada laga yaabo in ay kormeeraan oo nuqul ka qaataan macluumaadkaaga waxaa ka mid ah Guddiga Dib-u-eegista Hay'adaha (IRB), guddiga bixiya ilaalinta anshaxa iyo sharciyeynta ee cilmi-baarista, iyo wakiilada kale ee machadkan, oo ay ku jiraan kuwa leh mas'uuliyadaha kormeerka ama hubinta u hoggaansanaanta (sida Barnaamijka Hubinta Tayada ee Barnaamijka Ilaalinta Cilmi-baarista Aadanaha (HRPP)).

Macluumaad kasta oo gaar ah oo ku aqoonsan kara waa laga saari doonaa ama la beddeli doonaa ka hor inta aanan daabacin wax warbixin ah ama wadaagin natiijooyinka ama xogta daraasaddan. Jawaabaha waa la qarin doonaa, si guudna waa loo soo koobi doonaa.

Dabeecada ikhtiyaariga ah ee Daraasadda:

Ka-qaybgalka daraasaddan waa ikhtiyaari. Ka-qaybgalayaashu waa in ay da'doodu tahay 18 sano ama ka badan. Go'aankaaga ku saabsan inaad ka qaybqaadato ama aadan ka qaybqaadan doonin saamayn kuma yeelan doono xiriirkaaga hadda ama mustaqbalka ee Jaamacadda Minnesota, Jaamacadda Washington, ama Jaamacadda St. Thomas. Haddii aad go'aansato inaad ka qaybgasho, waxaad xor u tahay inaad ka jawaabin su'aal kasta ama aadan ka noqon waqti kasta adoon saamaynayn cilaqaadkaas. Ma jirto magdhow loogu talagalay ka-qaybgalka.

Xiriirada iyo Su'aalaha:

Cilmi-baarayaashan wadda daraasaddan waa: Bonnie Keeler (Jaamacadda Minnesota), Jacques Finlay (Jaamacadda Minnesota), Chip Small (Jaamacadda St. Thomas), iyo Spencer Wood (Jaamacadda Washington). Haddii aad qabto su'aalo, waxaa lagugu dhiirigelinayaa inaad la xiriirto maareeyaha mashruuca, Erin Niehoff (Jaamacadda Minnesota) oo laga helo: ern@umn.edu.

Cilmi-baaristan ayaa dib loo eegay oo ay ansixisay IRB gudaha Barnaamijka Ilaalinta Cilmi-baarista Aadanaha (HRPP). Si aad ula wadaagto jawaab celinta si gaar ah HRPP ee ku saabsan khibradaada cilmi-baarista, wac Khadka Difaaca Ka-qaybgalayaasha Cilmi-baarista 612-625-1650 (Wicitaanku waa lacag la'aan: 1-888-224-8636) ama u tag z.umn.edu/participants. Waxaa lagugu dhiirigelinayaa inaad la xiriirto HRPP haddii:

- Su'aalahaaga, welwelkaaga, ama cabashooyinkaaga kama aynan jawaabaynin kooxda cilmi-baarista.
- Ma la xariiri kartid kooxda cilmi-baarista.
- Waxaad rabtaa inaad la hadasho qof aan ahayn kooxda cilmi-baarista.
- Waxaad qabtaa su'aalo ku saabsan xuquuqdaada ka qaybqaadaha cilmi-baarista ahaan.
- Waxaad doonaysaa inaad hesho macluumaad ama aad fikrad ka dhiibato cilmi-baaristan.